CHILDREN'S AID SOCIETY *of* TORONTO

LA SOCIÉTÉ DE L'AIDE *à* L'ENFANCE DE TORONTO

Ku Kaliyeysi Guriga

Sidee ayaad ku ogaan kartaa marka ilmaha aad kaga tegi kartaa keligood Ilaalo la'aan?

Ilmahaaga lix -sano jir ah ayaa hurdada kasoo kacay markii u riyo xun ku riyooday. Isaga oo dhacdhacaya ayuu qolkiina jiifka soo galay markaas ayuu arkay in aydaan joogin. Wuxuu raadis ku dhaqaaqay guriga guul la'an, markaas ayuu dareemay inuu guriga keli ku yahay. Taasi oo ka duwan filimka, arrintan ma aha wax lagu maadsado.

Waa khatar in ilmaha laga tago iyada oo aan la ilaalineyn. Taasi waxay keeni kartaa khatar waana arrin kasoo horjeeda sharciga. Inkastoo ereyga dayicid ilmaha sharci ahaan loola jeedo ka tagid ilmaha ee soo noqod lahayn, mararka qaarkood waa ay dhacdaa in waalidku ay muddo gaaban ilmaha keligood ka tagaan.

Ma jiro sharci Ontario ee dhigaya inay jirto da' gaar ah oo ilmaha laga tegi karaa keligood iyada oo ayna cidna ilaalineyn. Sharciga waxa ka jira mugdi marka la eegayo da'da munaasabka ah, sababtoo ah waxaa jira arrimo badan ee kala duwan ee u baahan in la tixgeliyo. Mid ka mid ah ilmaha ee kow iyo toban –sano jir ah waxaa laga yaabaa inuu dareemo ku keliyeysiga guriga inay nasteexo u tahay, wuuna ogyahay wixii u sameyn lahaa haddii arrin degdeg ah timaaddo, halka mid kale oo kow iyo toban -sano jir ah u dareemayo walwal iyo isku kalsooni la'aan.

Marka ugu horeysa ee ilmaha keligood laga tagayo, waalidku waa inay la hadlaan si ay u hubiyaan inay isku kalsoon yihiin inay keligood ahaadaan. Haddii ay isku kalsoon yihiin inay keligood joogaan, waa inaad ka dhaadicisaa halka aad aadeysid, una caddeysid inta aad maqnaaneysid. Hubi in ilmuhu ay dareen ahaan iyo ficil ahaan diyaar u yihiin in keligood guriga looga tegi karo.

Khataraha guriga ee la fili karo in ay halis gelin karaan nolosha carruurta meel kasta waa ay ka jiraan. Waxay ku gabban yihiin jikada, musqusha iyo qolka ciyaarta ee carruurta. Waxay ku yimaadaan qaabab, midabo iyo xajmiyo kala duwan, oo ay ilmaha saameyn karaan xataa iyada oo ay waalidku joogaan guriga. Khataradaas waxay noqon karaan waxyaabo sun ah, jaranjarooyinka aan la ilaalin, ama baalkooni u furan albaabada iyo dariishadaha. Carruurta, gaar ahaan carruurta aadka u yaryar, ma awoodaan in ay naftooda ka fogeeyay xaaladaha halista ah. Dhab ahaantii, xataa haddii carruurta isku dayaan inay ka fogaadaan khatarta, waxa suurigal ah inayna dareemin in waxyaabaha qaarkood yihiin khatar, sidaa darteed waa muhiim inay waalidku muhiimad siiyaan koriisimaha ilamahooda.

Marka waalidku go'aansado in carruurta ay qaan gaar noqdaan masuuliyedna qaadi karaan in laga tegi karo keligood iyada oo aan la ilaaneyn, go'aankaas waa in ay la socotaa qorshe badbaado, sidaas darteedna carruurta ay garan karaan sidii in ay ku xallin lahaayeen xaaladaha kala duwan marka guriga ay keli ku yihiin. Carruurtu waa in ay yaqaanaan sida loo waco 911, iyo waxa la sameeyo haddii uu dab kaco. Waa inay jiraan sharciyo kale ee guriga haddi u qof telefoonka soo waco ama u albaabka soo garaco. Carruurtu waa inayna furin albaabka haddii qof soo garaaco, haddi qof telefoonka soo wacana, waxa habboon inay yiraahdaan aabe ama hooyo musqusha ayey ku jiraan markaas ma iman karaan. Xeeladahani waa kuwo si fudud carruurta loo baro, laakiin noqon kara kuwo aad wax ku ool ah. Haddii usan jirin qof carruurta la jooga inta waalidku maqan yahay, deriska ayaa kaa caawin kara iyaga oo isha ku haynaya guriga, iyo waalidiintuna waa inay mar walba dhaafaan telefoon lambar lagala soo xiriir karo, haddii wax degdeh dhacaan.

Shan Calaamadood ee laga shakin karo ee Hab Dhaqanka

Waalidiinta caruurtooda ka tago iyada oo aan lala joogin waxay go'aankooda saldhig uga dhigaan heerka qaangaarka carruurtooda, waana inay xaqiijiyaan in carruurtu ay

dheeraad….

(….sii-socda)

Ku Kaliyeysi Guriga

badbaado ahaanayaan. Haddii arrintooda loo gudbiyo Hay'adda Gargaarka Carruurta (CAS) iyo haddii booliska ay u muuqato inayna ahayn in carruurta keligood la tago, waxaa lagu soo oogi karaa dambi dayicid carruurta.

Haddii hay'adda CAS la waco si ay u baaraan, shaqaalaha badbaadu waxay fiirinayaan calaamadahan:

Miyuu waalidku ilmaha markan ka hore uga tagay iyada oo aan lala joogin?

Suurogal ma noqon kartaa mustaqbalka in waalidku ay ilmaha ka tagi doonaan iyada oo aan lala joogin?

Muxuu noqon dareenka waalidka marka lagala horyimaado sababta ay ilmaha keli ahaanta uga tageen?

Waalidku ma fahamsan yahay khatarta falalkoodu ay ku saameyn karaan caafimaadka iyo ammaanka ilmaha?

Muddo intee le'eg ayuu ilmuhu keli ahaa iyada oo aan lala joogin?

Haddii derisku ay si dhab ah u ogaadaan in ilmaha laga tegey iyada oo aan lala joogin si degdeg ah waa inay telefoon diraan ay macaawimo ku codsanayan. Waxay la soo xiriir karaan ama annaga ama hay'adda CAS ee degaankooda. Haddii ay xaalad tahay mid halis sare ah , kasoo qaad ilmo yar ayaa baalkooniga lagu arkay, waxaan wacayna booliska iyaga oo si degdeg ah baabur ugu soo diraya. Derisku waa in ay wacaan hay'adda CAS ee deegaankooda ama Booliska, haddii ay ka shakiyaan in ilmo keligood laga tegay, ayna khatar kusoo wajahan tahay.

Marka laga reebo ilaalo la'aanta ilmaha, waxaa si lama filaan ah u dhici karta in ilmuhu ay ka dhuuntaan ilqabadka waalidka ama ayna waalidku feejigneyn. Waxa dhici karta in waalidka ay hurdo la tagto, oo markaas ay suurigal tahay in ilmuha u fududaato inay albaabkii ama dariishadii ka gurguurtaan ama ka baxaan oo ay xaalad khatar ah galaan.

Waxaa jiray dhacdo ah in gabar shan sano jir ah , la helay iyada oo wareegeysa guryaha waaweyn oo la dego. Hooyadeed ayaa qaadatay daawo markaas ayey hurdo la dhacday. Waalidiintu iyo daryeelayaashu waa inay mar walba feegjignaadaan marka ay carrurta ilaalinayaan. Waalidku sidoo kale waa inay la socdaan markii ay daawo cusub qaadanayaan wixii saameyn ah ay leedahay, sida hurdeysanaan oo kale. Haddii waalidku u xanuunsan yahay, ama hurdeysan yahay, waxay tahay inay qof saaxiib ah u yeertaan si u ilmaha ugu ilaaliyo in muddo ah.

Ilmo-hayntu waa wax muddo dheer soo jiray oo beddel u noqday carruurta keligood laga tegayo. Inkastoo oo usan sharcigu caddeyneyn qofka dhalinyaro ah inta ay noqon karto da'diisu inuu ilmo-hayn karo, waalidiinta ayey tahay inay qayb ka qaataan badbaadinta ilmahooda, iyaga u shaqaaleynaya ilmo-haynta dad waayo aragnnimo, tababar iyo meel loo raaco leh. Adeegyada sida St. John Ambulance, ayaa bixiya tababaro Ilma-haynta, oo ay ku jiraan gargaarka degdegga ah iyo tallaabboyinka degdeg ah.

Waalidiintu waxay macluumaad ka heli karaan adeegyada bulshada marka ay raadinayaan meelaha Maalin-Jooga ilmaha bixiyaha. Dugsiyada deegaanku waa ilo wanaagsan ee aad xog ka heli kartid, xoghayanadu waa yaqaannaan hooyooyinka deegaanka ee ilmaha ilaaliya. Waalidiintu waa inay raadiyaan qof masuul, kaas oo yaqaan sida loo wajaho haddii oo lala kulmo arrimo iyo dareen caafimaad.

Ka tegidda carruurta ee marka ugu horeysa, waaliddinta iyo carruurtaba culus weyn ayey ku noqotaa. Ogaanshaha marka carruurtu ay nafsiyan diyaar u yihiin mas'uuliyaddan, iyo sugidda tallabooyin ammaanka, dhammaantoood waa qayb ka mid ah qorshaynta muhiimka ah.